# U Dadaarmid Dhaxal



**Buugani waxa loogu talo galaya dadka degan Alberta eek a fikiraya in ay qoraan ama badelaan dardaaran dhaxal.** Dardaarnku wuxuu kuu ogalaanayaa inaad waxaad leedahay uga tagto dadkaad jeceshahay marka loo eego rabitaankaaga. Hadii aad dhimato bilaa dardaaran, had iyo jeeraale waa mid kharash badan, aad u adag wakhtina ku baxaayo in la go'aamiyo dhaxalkaaga. Buugani wuxuu ku siinayaa kaliya warbixin guud, maaha talo sharci ah. Hadii aad u baahan tahay caawimo ama talo dheeraad ah, ka eeg dhamaadka buugan macluumaad dheeraad ah.

*Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan.*
*Wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo ku sahabsan*
***kaliya sharciga Alberta**.* *2020*

Centre for Public Legal Education Alberta

## Iska fogeyn

**Waxyaabaha buugan yar ka kooban yahay waxaa loo bixiyaa macluumaad guud ahaaneed oo kaliya. Ma aha talo sharci.** Haddii aad qabto dhibaato sharci, waa inaad la tashataa qareen.

Macluumaadka uu ka kooban yahay buugan yari sax ayuu ahaa wakhtigii lasoo saarey. Ogsoonow in laga yaabo inay jiraan isbeddelo ku-xiga oo ka dhigaya macluumaadka mid wakhtigiisii dhaafey (dhacay) waqtiga aad akhrineyso. Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd. ma masuul kama noqon doonto wixii khasaare ah ee ka imanaya ku tiirsanaanta ama ficil lasameeyo (ama aan la sameyn) taas oo ka dhalatay macluumaadkan.

## Mahadnaq

Waxaan jeclaan lahayn inaan uga mahadcelino Hay'adda Sharciga Alberta iyo Waaxda Caddaaladda Canada bixinta maalgalinta hawlaha-shaqo, taas oo suuro galineysa daabacadaha sida tan.

Photo Credit: iStock 000034163880

**© Xarunta macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd., Edmonton, Alberta**

**Dib-eegistii u danbeysay 2020**

***Ka hawl-galeysa:* Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta**

Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd, oo ka hawl galaysa Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha Alberta, waa urur aan faa'iido doon ahayn oo hadafkiisu yahay inuu dadka ka caawiyo inay fahmaan sharciga maadaamoo uu saameynayo noloshooda maalin walba.

Waxaanu soo saarnaa buug yar oo ku qoran luqad fudud, bandhigyo, iyo qalab waxbarasho oo kale si dadka looga caawiyo inay aqoonsadaan oo ay uga jawaabaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda sharci. Waxaan leenahay barnaamijyo kala duwan, waxaanna bixinnaa macluumaad sharci ah iyo gudbin ku saabsan mawduucyo sharci oo badan. Macluumaad dheeri ah, Fadlan booqo www.cplea.ca.

Centre for Public Legal Education Alberta

#800, 10050 112 Street
Edmonton, Alberta T5K 2J1

**Phone** 780.451.8764
**Fax** 780.451.2341
**Email** info@cplea.ca
**Web** www.cplea.ca

# Tusmada


**Waa maxay dardaaran dhaxal?** **4**

Waa maxay Dhaxal? 5

Dhimasho bilaa dardaaran 6

**Dardaarmid** **7**

Awood Maskaxeed 8

Magacaabista Wakiil Shakhsi 8

Markhaatiyada Dardaaranka 9

Wax-yaabaha la tix-galinayo 10

*Ka hor intaanad Dardaarmin* *10*

*Hantidaada* *10*

*Diyaarinta Aaska* *12*

*Masuulka caruurta yaryar* *12*

*Waajibaadka Xubnaha Qoyskaaga* *12*

Halka la dhigo Dardaarankaaga 13

**Dib u eegista Dardaaranka** **14**

**Badelista Dardaaranka** **15**

**Maamulida Dhaxalka** **16**

**Badelista Dardaaran** **17**

**Erey-bixinta** **18**

**Macluumaad** **21**

# Waa maxay dardaaran dhaxal?

**Qaate, Hantiyeed**, Qof (shakhsi ama urur) kazoo dhaxla dhamaan ama qeyb ka mid ah hantida qof ka dhintey.

**Hanti Gaar ah,** Hanti uu dhaxalku dhigaayo in la siiyo qofka lagu magacaabey.

**Hadhaaga (Hantiyeed),** Baaqiga hantida ka dib marka hanti cayiman laga bixiyey.

**U dhiibid hanti si ku meel-gaadh ah,** U dhiibid hanti si ku meel gaadh ah waa nidaam lagu haynayo hantida. Shakhsi ama shirkad, loo yaqaan sii-haye, ayaa u haya maamulana hantida qof kale ama dadka kale, oo loo yaqaan Helayaasha.

**Dardaaran** waa bayaan sharci ah oo sheegaya sidaad u rabto in hantidaada loo xaliyo markaad dhimato ka dib. Hantida la qabiyey iyadoo la raacayo tilmaamaha dardaaranka waxa loo yaqaan **dhaxal**. Markaad dardaaran sameyso, Waxaad tahay **Dhaxal-bixiye**. Qofka aad masuul uga dhigto fulinta rabitaanka dardaarankaaga waxaa la yidhaah Wakiilka Shakhsiga.

**Dardaarnku ma dhaqan galaayo ilaa iyo aad dhimato.**

**Waxad ugu talin kartaa hantidaada sidaad rabto intaad nooshahay. Hadii Dardaarankaagu sheegayo in qof uu helayo hanti cayiman oo aanu lahayn hantidaasi markaad geeriyooto, qofkaasi heli maayo hantidaasi.**

Alberta, iyo gobolkasta oo Kanada ah, Dardaaranka waa in uu ahaadaa qoraal. Shuruudaha kale way kala duduwan yihiin iyadoy ku xidhan tahay nooca dardaaranka-dhaxalka.

Waxa jira saddex nooc oo dardaaran-dhaxal:

1. **Dardaaran rasmi ah** Waxa saxeexa dhaxal-bixiyaha iyo labo markhaati, oo dhamaantood xaadir ah. Dardaraan rasmi ahi wuxuu u baahan yahay in gabi-ahaanba koomiyuutark lagu qoro ama la daabaco ( maaha in gacanta lagu qoro)
2. Dardaaranada gacanta lagu qoro, waxa loo yaqaan **Dardaaran gacanta lagu** qorey (hologaraaf ah), waana sharci Alberta lakiin maaha dhamaan gobolada ama dhulka Kanada. Alberta dhexdeeda, dardaaranka gacanta lagu qorey waa inuu noqdaa mid uu qorey dhaxal-bixiyuhu, waa inuu noqdaa miduu saxeexay dhaxal bixiyuhu, oo aan makhraati lahayn. Dardaaranaa noocan ahi waxa la diyaarin karaa wakhtiyada xaalada degdega ah, lakiin waxa muhiim ah in ay si cad u tilmaamayaan waxa ujeedooyinkaagu yihiin.

3. Dardaaranada uu qorey dhaxal-bixiyuhu isagoo u shaqeynaya ciidanka kanada (ciidanka bada, dhulka ama hawada) waxa loo yaqaan **Dardaaran milatari**. Dardaarnada milatari waxa saxeexa dhaxal-bixiyaha lakiin makhraati ma leh.

Caadiyan, dardaaranku wuxuu leeyahay dhowr qeybood:

- Joojinta (dib uga noqoshada) dardaarankasta oo hore;
- Magacaabista wakiil shakhsi iyo badelkiisa;
- Magacaabista **dhaxal-qaateyaasha hanti/hadiyad cayiman**;
- Magacaabista dhaxal-qaatayaasha **hadhaaga** dhaxalka;
- Magacaabista masuulka ama abuurista **u sii-hayn** ilmo yar (hadey ku habool tahay); iyo
- Faahsaahinkasta oo kale kasta oo sidaad rabto ah. Waxa fiican in qofkasta dardaarmo. Xanuun ama shil ayaa wakhti kasta ina haleeli kara. Dardaaranku waa habka kaliya ee lagu ilaalin karo cida helysa waxaad leedahay markaad dhimato.

## Waa maxay Dhaxal?

Dhaxalkaagu waa hantida aad leedahay markaad dhimato, ooay ku jiraan dhulka iyo dhamaan waxaad leedahay. Dhaxalkaaga waxa la qeybinayaa iyadoo la raacayo tilmaamaha dardaarankaaga.

**Hantida dhaxalkaaga marka hore waxa loo isticmaalayaa in lagu bixiyo daymaha iyo cashuuraha, ka dibna waa la qeybinayaa iyadoo la raacayo tilmaamaha Dardaarankaaga.**

Badh ka mid ah hantidu ma noqoneyso qeyb ka mid ah dhaxalkaaga maxaa yeeley lama socoto dardaarankaaga. Noocyada hantidee socda kama mid aha dhaxalkaaga:

- Hantida cida ku diwaan-gashanini tahay **labo kiroole iyo wax-ka badan**. Noocyadan hantidan ah waxa ku jira dhulka, guri ama akoon bangi.
- Hantida aad u magacowdey qaate/dhaxle aan ahayn dhaxalkaaga. Hantida noocan ah waxa ka mid ah akoonada maal-gashiga, siyaasadaha caymiska ama qorshayaasha hawl-gabka.

**Siinta maamulka,** Amar amaxkamadeed oo magacaabaya maamule/masuul hanti qof bilaa dardaaran ah( dhinta isagoo dhaxal ka u dardaarmin) sidoo kalena xaqiijineysa in dhaxalka loo qeybin karo dadka ku dhaxlaya dhaxalka sharciga dardaaran la'aanta.

**Maamule,** Qof ay maxakamadi awood u siisey inuu maamulo oo maareeyo hanti dhaxal ah.

**Xaas,** Qofka qof uu si sharci ah u guursadey/qabo.

**Lamaane isku-tiirsan,** Qof aad la leedahay xidiidh isku-tiirsanaan lamaane.

# Dhimasho bilaa dardaaran

Hadii aad dhimato bilaa dardaaran, waxa logu odhanayaa dardaaran-laawe.

Labo dhibaato oo degdega ayaa soo baxaya:

- Ma jirto cid loo magacaabo hilista dhaxalkaaga; iyo
- Ma jiro wax qoraal rasmi ah oo diwaan-gashan oo sheegaya wixii aad rabtey inaad ku sameyso dhaxalkaaga.

Alberta dhexdeeda waxa jira labo sharci oo la tacaala dhibaatooyinka.

Marka hore, *Xeerka maamulka dhaxalku* wuxu dhigayaa cida ka codsan karta maxkamada **bixinta maamulka** dhaxalkaaga. Cidani (qofkan) waxa loo yaqaan **Maamule**. Xeerka ayaa go'aaminaya liiska dadka codsan kara. Qofna awood uma leh inuu iskal tacaalo dhaxalkaaga ilaa maxkamadi siiso fasax.

Marka maamule maxkamadu u magacowdo, *Xeerka Dardaaranka iyo Xigaalka* ee Alberta ayaa go'aaminaya cida dhaxleysa dhaxalkaaga. Maamuluhu waa inuu marka hore bixiyaa dhamaan daymahaaga isagoo isticmaalaya hantida dhaxalka. Hanti kasta kale oo soo hadha, hadii ay wax soo hadhaanba, had iyo jeer waa la iibiyaa lacagta laga helana waxa la siiyaa dhaxle-yaasha.

Sharicigu wuxuu kazoo qaadayaa inaad uga tagtey dhaxalkaaga qoyskaaga hadii aad sameysay dardaaran.

War-bixin dheeri ah oo ku sahabsan dhaxalka iyo dhaxalka bilaa dardaaranka ah, fiiri warqada dhaxlayaasha ee CPLEA "**Marka qof dhinto bilaa Dardaaran Alberta dhexdeeda**."

# Dardaarmid

Albeta dhexdeeda, qofkasta oo weyn (18 dadiisu tahay ama ka weyn) kaasi oo maskax ahaan u awooda wuu dardaarmi karaa.

Qofka ka-yar 18 wuu dardaarmi karaa hadii uu:

- Leeyahay **Xaas** ama **xidhiidhka isku-tiirsanaan lamaane**; ama
- ka tirsan yahay adeeg ciidanka Kanada (ciidanka bada, bariga ama circa); ama
- Fasax ka haysto maxkamad.

**Daraamidu waa mubaax, maaha qasab.**

Waxa jira saddex nidaam oo loo dardaarmo:

1. qabso looyar si uu kuugu qoro Dardaaran;
2. iibso iyo dhameystirid xidhmo iskaa-usamee dardaaran ah; ama,
3. Ku Qor  Dardaaran gabi ahaanba gacantaa (adoon koomiyuutar isticmaalihayn)

Waxa ku jira faaidooyin inaad qabsato looyar kuu diyaariya Dardaarankaaga. Looyarku wuxuu leeyahay khibrad badan oo kaa caawineysa inaad la tacaasho arimaha sida cawaaqibta cashuurta, arimaha caalimiga ah, bixinta/sii-haynta, sameynta qorsheyn ku haboon caruurtaada yaryar, iyo arimo kale oo badan.

Waxa gaar ahaan muhiim ah inaad la tashato looyar markaad dardaarmeyso hadii adigu:

- Aad leedahay dhaxal aad u kakan oo badan (tusaale ahaan: hanti ganacsi, caruur ku nool Kanada dibadeeda, iyo caruur leh baahiyo gaar ah);
- Aad is furteen ama kala is-fureysaan;
- Aad leedahay qoys labo qof iyo caruurtooda ka kooban;
- Aad da' tahay ama xanuusaneyso,  madaamoo awoodaada maskaxeed la isweydiin karo;

**Xidhiidhka-isku tiirsanaanshaha lamaanaha,** Kalmad u gaar ah Alberta loona isticmaalo xidhiidhada ka baxsan guurka oo uu xukumo xeerka isku – tiirsanaanta lamaanaha Alberta.

Waa "xidhiidh isku tiirsanaasho" oo ka dhexeeya labo qof oo:

- Wada noolaa saddex sano ama in ka badan; ama
- Wada nool oo ilmo ka wada dhexeeyo, dhalmo ahaan ama korsoomo; ama
- Saxeexay heshiish isku tiirsanaan lamaane.

"Xidhiidh isku Tiirsanaansho" oo labo qof:

- Midba midka kale nolosha la wadaago; iyo
- Dareen ahaan isku diyaar ah; iyo
- U shaqeeysta hal guri iyo dhaqaale.

- Dareento in lagugu cadaadiyey ama cid kale ku khasabtey;
- Aad ka fikireyso guursasho; ama
- Aad bilaabeyso ama dhameyneyso xidiidh isku tiirsanaan lamaane.

Dardaarankaagu wuxuu ka koobnaan doonaa tilmaamahaaga ku sahabsan waxaad rabtey inaad ku sameyso hantidaada markaad geeriyooto ka dib. Luuqadu waa in ay noqotaa mid cad oo fudud si aanu qofna ugu dawakhin  waxaad u jeedey.

## Awood Maskaxeed

Inaad lahaato awood maskaxeed (mararka qaarna loogu yeedho "awood dardaaran") si aad u dardaaranto macneheedu waxa weeyi:

- Inaad ogaato inaad sameyneyso dardaaran fahansan tahayna waxa dardaaran yahay;
- Inaad ogtahay waxaad hanti leedahay; iyo
- Inaad ka warheyso dadka aad rasmiyan siin doonto.

Waa inaad lahaataa awood dardaaran wakhtiga aad dardaarmeyso. Hadii aad weydo awooda maskaxeed ka dib marka aad dardaaranto, dardaarankaagu wali waa sax.

## Magacaabista Wakiil Shakhsi

Wakiilkaaga shakhsi:

- Wuxuu noqon karaa qof-weyn ookasta maskaxiyana u awooda ama shirkad sida shirkad sii-hayneed); ama
- or wuxuu noqon karaa dhaxle lagu magacaabey dardaarankaaga;
- Wuxuu noqon kaaa looyar, lakiin waa inaad hubisaa in qofkaasi uu rabo inuu ku matalo intaanad magacaabin ka hor.

Matalahaagu wuxuu noqon karaa qof sidoo kale aqoon u leh arimaha ganacsiga uuna noqdaa qof kaa nolol danbeeya adiga.

Ka hor intaad magacaabin wakiil shakhsi , hubi in uu:

- yahay aamin la iskuna haleyn karo;
- Fulin karo tilmaamahaaga
- Wakhti u hayo awoodana inuu fulinyo waajibaadka wakiil shakhsi; iyo
- Rabo inuu qabto shaqada.

Wakiilkaaga shakhsi maaha waajib inuu ku noolaado Aberta. Laakiinse, hadii aad doorato qof aan ku nooleyn Alberta, qofkaasi waxa looga baahan karaa inuu u soo diro maxkamada damiin ka hor inta aanu la tacaalin dhaxalkaaga.Sidoo kale, Waxa jiri kara cawaaqib cashuureed oo dhaxalkaaga ah hadii wakiilkaaga shakhsiyadeed ku nool yahay meel ka baxsan Kanada. Waa inaad la tashataa looyar hadii aad rabto inaad magacowdo qof ku nool meel ka baxsan Alberta.

Waxaad magacaabi kartaa in ka badan hal wakiil shakhsi si uu kuu matalo. Hadii ay jiraan labo iyo wax ka badan oo wakiil shakhsi ah, waa in ay kuu matalaan si wada jir ah ilaa iyo dardaarankaagu diidayo ama amar maxkamadeed mooye. Hadii aad magacowdo in ka badan hal wakiil shakhsi, hubi in ay awoodi doonaan in ay u wada shaqeeyaan si wada jir ah. Hadii uu dhinto hal wakiil shakhsi, ka kale ayaa kalii matalaya.

Waxa sidoo kale muhiim ah in la magacaabo ugu yaraan badalka (kabista) wakiil shakhsi lacala hadii doorashadaada koobaad uu qaban kari waayo shaqada. Hadii aad magacowdo dhowr badal, ka fiirso sida aad rabto in ay ugu kala horeeyaan matalaadada.

## Markhaatiyada Dardaaranka

**Dardaaran rasmi** ahi  waa inuu lahaadaa saxeexa labo markhaati.

Markhaatigu waa inuu:

- 18 jir yahay ama ka weyn yahay;
- aanu ahayn dhaxle ku jira dardaaranka ( hadii kale hanti kasta oo qofkaasi ku leeyahay dardaaranku waxay noqon kartaa waxba kama jiraan); iyo
- Noqon xaas ama lamaane isku tiirsan ee qofka dhaxlaha dardaarankaah ( hadii kale hanti kastoo qofkaasi ku leeyahay dardaarnku waxay noqoneysaa waxba kama jiraan)

Wakiilkashakhsi wuxu noqon karaa markhaati ilaa iyo inta aanu sidoo kale ahayn dhaxle.

Markhaatiyadu uma baahna inuu akhriyo dardaarankaaga. Waxay ay tahay insameeyaan waa in adoo saxeexaya dardaaranka, ka dibna labadooduba ku saxeexaan dardaaranka hortaada.

Markhaatiyada waxa looga baahan yahay in daacad ku dhaqmaan diidaana in ay markhaati ka noqdaan dardaaran hadii ay haystaan sabab la isku weydiin karo awoodaada maskaxeed.

# Wax-yaabaha la tix-galinayo

## Ka hor intaanad Dardaarmin

Ka hor intaanad Dardaarmin, waa inaad:

- ❒ Sameysaa liiska dhamaan hantida aad haysato;
- ❒ Go'aamisaa cida aad rabto inaad siiso hantidan markaad geeriyooto;
- ❒ Ka fikirtaa in ay jirto hanti uu yeelan karo dhaxluhu ( taas oo la odhan ma helaayo dhaxalka dardaarankaaga, sida hanti labo kiroole iyo waxka badan loo leeyahay amah anti aad u magacowdey dhaxle);
- ❒ Samee liiska dhamaan daymaha lagugu leeyahay;
- ❒ Go'aanso cida aad usoo jeedineyso inuu ka noqdo masuul caruurtaada yaryar;
- ❒ Ka warheyn waajibaadkaaga sharci ee kaa saran xaas kasta, ama xaas hore, lamaane isku tiirsan, caruur, caruurta aad awow/ayey u tahay, iyo caruurta-caruurta aad awow/ayey  u tahay dhashay;
- ❒ Tixgalisaa hanti kasta oo aad jeclaan lahayd inaad bixiso;
- ❒ Dooratаa qof kuu matala wakiil shakhsi ahaaneed; iyo
- ❒ Qiimeysaa isbadalada qoyska sidaasina aad u sameysaa go'aamadaada.

Hubi inaad sid ugu macquulsan u hubto sharaxaada rabitaankaaga. Hadii uu jiro wax aanad fahmin, wakiilkaaga gaarka ah waxa suurto gal ah inuu weydiyo maxkamada tilmaam, nidaamka sharicguna wuxuu noqon karaa mid kharash badan.

## Hantidaada

Dardaarankaaga, waxaad kula tacaali kartaa dhamaan hantidaada: Dhulka, waxyaabaha aad leedahay, lacag, maal-gashiyo, waxyaabaha aad gaarka u leedahay, hantida ganacsiga, iwm. Xasuuso hadaba, qeyb cayiman oo ka mid ah hantidaadu ma galeyso dhaxalkaaga lagulamana xalinayo dardaarankaaga.

**Hadii aanad hubin inaad hanti lala leedahay wadaaga-yaal ama dadkale idinka dhaxeyso, hubi ciwaanka shahaadada (Hantida ma guurtada ah) ama akoonada bangiyada.**

### RRSPs, RRIFs, TFSAs, iyo akkonada kale ee maal-gashi, qorshayaasha hawl-gab iyo siyaasadaha caymiska

Had iyo jeeraale noocyadan hantida ah kaama qeyb dhaxalka maxaa yeelay waxaad ku magacaabi kartaa dhaxle akoonka dhexdiisa ama qorshaha. Tusaale ahaan, Markaad bilowdo RRSP (akoonka keydka), foormku wuxuu badanaa ku weydiin doonaa inaad u magacowdo dhaxle. Hadii halkaa aad ku taxdo  hal qof ama in kabadan, dadkaasi ayaa dhexli doona lacagta akoonka ku jirta markaaad dhimato. Dhaxlayaashan waxa waajib noqon doonta in ay usoo gudbiyaan cadeyn inaad geeriyootey ah  haayada ama maamulaha qorshaha ka hor intaan lacagta la siin.

Hadii aad doorato inaanad magacaabin dhaxle ama doorato inaad umagacowdo hantidaada dhaxle, lacaguhu waxay u gudbayaan dhaxalkaaga waxaana la qeybin doonaa iyadoo la raacayo tilmaamaha dardaarankaaga. Hadii aanad kaga tagin tilmaamo cayiman dardaarankaaga waxaad rabto in lacagtan in lagu sameeyo, ka dib waxay noqon doontaa qeyb ka mid ah hadhaaga dhaxalkaaga.

### Hantida si wada-jir ah loo-leeyahay

Waxaad ayaad la-yeelan kartaa dadkale, sida dhul, guri, ama akoono bangi.

Hadii aad la leedahay hantidan dadkale sida **hantida lagula-leeyahay**, tani macneheedu waa dhamaan mulkiiilayaashu hantida si isled ayey u leeyihiin, hantidana waxa yeelanaya mulkiilaha nool marka mid dhinto.Tusaale ahaan, hadii adiga iyo xaaskaagu/saygaagu u diwaanshatihiin mulkiilayaasha si wada-jir ah uleh gurigaaga, xaaskaaga/saygaaga ayaa noqon doona cid qudh ee iska leh hadii aad adigu geeriyooto marka hore. Waxaad noqon doontaa mulkiilaha qudha hadii xaaskaagu/saygaagu dhinto hortaa.

Waxa ka reeban sharcigan waa marka mulkiilayaashu mar wada dhintaan, ayna adag tahay in la sheego midka hor dhintey. Hadii tan dhacdo, hantida wada-jirka looleeyahay waxa loola dhaqmi doonaa sida hanti-wadaag ah.

Hadaad hanti u leedahay **wadaag ahaan**, tani macneheedu waxa weeyi in mulkiile kastaba leeyahay qeyb/sheer hantida ka mid ah. Qeybta mulkiile kasta maaha in ay isleekaato. Tusaale ahaan, hadii adiga iyo xaaskaaga/saygaagu midkiiba leeyahay boqolkiiba konton qeyb dhulka ka mid ah, tani macneheedu waxa weeyi in adiga iyo saygaagu/xaaskaagu heli doono kaliya badhka waxa ku dhaca hantida ka kale.

Hantida aad wadaag/qeyb ahaan ula leedahay qof kale waxay ku jirtaa hantidaada. Hadii aanad ugaga tagin wax tilmaam gaar ah hantidan dardaarankaaga, waxay ka mid noqon doontaa hadhaaga dhaxalkaaga. Lagayaabaa dhaxleyaashaadu in ay noqdaan mulkiilayaasha la leh dadka kale ee wadaaga. Ama waxa lagayaabaa in wadaagayaasha kale iibsadaan qeybtaada, lacagta laga helo dhaxalkana loo qeybiyo hab cayiman.

## Diyaarinta Aaska

Waxaad ku cadeyn kartaa tilmaamaha aaska dardaarankaaga, lakiin ma fiicna maadaamoo dardaaranka la heli karo ama la akhrin karo jinaasada ka dib. Waa inaad u sheegtaa qofka ugu macquulsan ee diyaarn kara aaskaaga waxa aad rabto marka horeba ama aad ka tagtaa qoraal gaar ah.

## Masuulka caruurta yaryar

Hadii aad masuul ka tahay caruur yayar, qof ayaad u magacaabi kartaa ilmahaaga markaad geeriyooto. Qofkani wuxuu noqon karaa wakiilkaaga gaarka ah ama qof ka duwan.

## Waajibaadka Xubnaha Qoyskaaga

Guud ahaan, waxaad xor u tahay inaad hantidaada siiso qofkii aad rabto. *Xeerka Alberta ee Dardaaranka iyo dhaxalku wuxuu* xakameynayaa xorriyaddan.

Haddii aadan si ku filan u siinin xubnaha qoyskaaga ee ku jira Dardaaranka, markaa Sharcigu wuxuu u ogolaanayaa xubnahaasi qoyska in ay ka codsadaan taageero hantidaada. Tani macnaheedu waa qayb ka mid ah hantidaada ayaa laga yaabaa in ay ku baxdo taageerida xubnaha qoyskaaga, wax kasta oo ka hadhay waxa loo qaybin doonaa sida aad asal ahaantii aad rabtay.

**Hadii aad bixineyso taageero xaas/say ama ilmo yar, waajibaadkaasi kulama dhimanayo. Hadii aanad ugu sameyn daryeel iyo taageero ku filan dadkan kugu tiirsan Dardaarankaaga, lacagaha ayaa laga qaadi doonaa hantidaada si loogu gudo waajibaadkan.**

**Xubnaha Qoyska** waxa lagu qayexaa xeerka:

- Xaaskaaga/saygaaga ama lamaane isku-tiiran;
- ilmahaaga oo da'diisu ka yar tahay 18 sano markaad dhimato, oo ka mid yahay ilmoku jira ilmo-galeenka hadhowna ku dhalanaya nolol.
- lmahaaga oo da'diisu tahay 18 jir ama ka weyn markaad dhimato oo aan awoodin in ay lafahooga wax u qabsadaan iyadoo ugu wacan tahay naafonimo maskaxeed ama jireed;

- ilmahaaga oo da'diisu tahay 18 jir balse ka yar tahay 22 sanadood marka aad dhimato oo aan lafohooga wax u qabsan Karin sababtoo ah waxay yihiin arday waqti-buuxa ah wax barata;
- Carruurtaada aad awooweayeeyo u tahay ay dhaleen kuwa aad awoowe/ayeeyo u tahay oo da'doodu ka yar tahay 18 sano markii aad dhimatid iyo cidda aad u taagan tahay meesha waalidka.

Garsooruhu wuxuu tixgelinayaa dhammaan duruufaha kiiska ka hor inta aan la go'aamin in uu taageero xubin ka mid ah qoyska, oo ay ku jiraan:

- Nooca iyo heer xidhiidhka idiin dhaxeeya adiga iyo xubinta qoyska;
- Da'da iyo caafimaadka xubinta qoyska;
- Awooda xubinta qoyska ee ka qeyb qaadasho taageeradeeda (sida helis shaqo);
- Waajibaadka sharci ee kaasaaran xubinta qoyska
- Xajmiga hantidaada iyo hantida kale ee xubin qoyska ahi heli karto ( sida hadii xubinta qoyska loo magacaabey dhaxal-qaate akoon bangi, siyaasad caymis ama qorshe hawl-gab ama hadii xubinta qoysku tahay wadaage hantida badh ku leh);
- Xaalada dhaqaale ee xubinta qoyska;
- Sababahaaga aanad u siinenyn xubintan ee dardaaranka. Way caawineysaa hadii dardaaranku yahay mid aad qortey oo aad saxeexday, ama hadii ay ku jiraan Dardaaranka.

**Masuul,** Cida **Ilmaha**, Qof leh masuuliyad sharci si uu u daryeelo dhaqaale ahaana u tageero ilmaha, iyo masuuliyada uu ku sameynayo dhamaan go'aamada la xidhiidha ilmaha. Ilaa maxkamadi amar bixiso, waalidka ilmaha ayaa masuulkooda ah.

## Halka la dhigo Dardaarankaaga

Dad badan ayaa doorta in ay dhigaan dardaarankooda meel amaan ah oo wakiilkooda gaarka ahi heli karo ogyahayna. Tani waxay noqon kartaa dhigaal sanquud amaan ama koobadiin gurigaaga yaal. Qaar kale ayaa u dhiibta shakhsi saddexaad oo ay aaminaan sida looyar.

# Dib u eegista Dardaaranka

Dib u eeg Dardaarankaag:

- ug yaraan hal-mar sanadkiiba;
- Markasta oo ay jiraan isbadalo muhiim ah ee xidhiidhka aad la leedahay dadka kale;
- Hadii xubin qoyskaaga ka mid ah, ama kuwo kale oo kugu dhow, is furan, guursadaan ama geeriyoodaan;
- Hadii wakiilkaag gaarka ahi dhinto ama yidhaahdo in aaney awoodin ama rabin in ay ku matalaan adiga; ama
- Hadii ay jiraan isbadalo muhiim ah oo caafimaadkaaga ah.

Ka dib markaad dib u-eegto Dardaarankaaga, waxaad go'aansan kartaa hadiiay u baahan yahay wax-kabadal.

## Isfuris ama kala-Tagis

Haddii aad is-furtaan ama aad joojiso in aad tahay ahato qof qaangaar ah oo ku jira xidiidh isku-tiirsan ka dib Febraayo 1, 2012, Dardaarankaagau weli waa mid ansax ah isbadalkuna ma saameynayo isbeddelka xidiidhka.

Lakiinse, qeybao gaara oo Dardaarankaaga ahi ma noqon doonaan sax:

- Hadii u dardaarantey hanti xaaskaagi/saygaagi hore ama xidhiidh lamaane hore, hantidaasi waa joojinayaa (kansalayaa) ilaa iyo aad si gaar ah ugu talo gashey qofkaasi inuu helo hantidaasi xataa ka dib is-furitaanka;
- Hadii aad xaaskaagii/saygaagi hore u magacowdey wakiilkaaga gaarka ah, magacaabistaasi waa la joojinayaa, macneheedu waa qofkaasi kuma matali karo. Hadii aad magacowdey wakiilo gaar ah oo kale, dadkaasi ayaa ku matali doona. Hadii aanad magacaabin wakiil gaar ah oo kale, Dardaarankaagu wali waa ansax lakiin qofkale ayaa u baahan doona inuu ka codsado maxkamada awood usiinta inuu maamulo.

# Badelista Dardaaranka

Waxa jira labo ha boo loo badelo Dardaarankaaga:

1. Waxaad qori kartaa warqad gaar ah oo badaleysa kaliya qeyb ka mid ah Dardaaranka. Tani waxa loo yaqaan **Warqada-waxka-badelka Dardaaranka.** Waa inaad saxeexdaa markhaatina u yeeshaa warqadan si la mid dardaarankaaga.

   Kalmadaha lagu bilaabo warqadani waxada badanaa lagu xusaa wax ka badelka Dardaaranka. Qeybo ka mid ah qoraalka Dardaaranka waa la joojiyaa ama waxbaa laga badelaa ama wax kale ayaa lagu badelaa. Waa in ay sheegtaa in, marka lag yimaado waxka badelkan, aad xaqiijisey shuruudaha orjinaalka Dardaaranka.

2. Waxaad sameyn kartaa Dardaaran cusub. Way fiicnan kartaa sidaasi inaad sameyso hadii aad rabto inaad wax weyn ka badesho ama aad mar horeyba sameysay dhowr warqada waxka-badelka dardaaranka ah.

   Qeybta ugu horeysa ee qoraalka dardaaranku badanaa wuxuu yidhaahdaa: "Waxaan joojiyey dhamaan Dardaaranadii iyo diyaarintii dardaaran kasta oo aan anigu sameeyey." Dardaaranki ugu danbeeyey, si fiicana loogu hogaansamey, waa midka la isticmaali doono geeridaada ka dib.

Waa **inaanad** badelin Dardaarankaaga adoo calaamadinaya ama xariiqaya kalmado. Isbadelkasta oo la sameeyo ka dib marka Dardaaranka la saxeexo ansax noqon-maayo. Taas badelkeeda, waa inaad sameysaa warqada waxkabelka dardaaranka ama Dardaaranka cusub hadii aad dooneyso inaad wax ka badesho.

**Warqada Tilmaam wax-ka badelka dhaxalka,** Warqad aad sameysid ka dib marka aad dhaxalka bixiso taasi oo wax ka badaleysa qaar ka mid ah waxyaabaha ku jira dhaxalka.

# Maamulida Dhaxalka

**Bixinta warqad dardaaran,** Amar maxkamadeed oo xaqiijinaya in dardaaranku sax yahay sidoo kalena xaqiijinaya magacaabista matale shakhsi oo lagu magacaabey dardaaranka.

Wakiilkaaga gaarka ah ayaa masuul ka ah maamulida dhaxalkaaga markaad geeriyooto ka dib.

*Xeerka maamulka dhaxalku* dajinayaa afarta waajibaad e ugu muhiimsane wakiilka gaarka ah:

- Aqoonsashada hantida iyo daymaha dhaxalka;
- Maamulida iyo maareynta dhaxalka;
- and Bixinta daymaha dhaxalka; iyo
- Qeybinta iyo xisaabinta maamulka dhaxalka.

Wakiilkaaga Gaarka ah:

- waa inuu ogeysiiyaa dhaxlayaasha iyo xubnaha qoyska siduu dhigayo xeerku;
- waxa maamulaya shuruudaha *Xeerka loo-dhiibtaha ee Alberta*. Sharcigan xanibaado cayiman kusoo rogayaa ficiladooda;
- Lagayaa inuu ka codsado maxkamada siinta ansixin-dardaaran si uu ula tacaalo dhaxalka.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan masuuliyada wakiilka gaar/shakhsiga  iyo sida loo maamulo dhaxalka, fiiri/eeg buuga yare e CPLEA ee **lagu magacaabo Noqoshada wakiil gaar ah.**

Warbixin dheeri ah oo ku sahabsan helida ansaxinta Dardaaranka, fiiri eeg buuga yare e CPLEA ee loo yaqaan **Hagaha helida ansaxa ama maamulka ee Alberta**.

# Badelista Dardaaran

Caqabada guud ee Daraanka wax aka mid ah sheegashooyinka in:

- Qofka Dardaarmaha ah lagu qasbey ama cadaadiyey inuu qoro Dardaaran;
- Dardaarmuhu aanu lahayn awood maskaxeed oo uu ku qoro Dardaaran;
- Dardaamuhu anuu siin daryeel iyo taageero ku filan xubnaha qoyska;
- Dardaarnku maaha ansax maxaayeelay si fiican looguma hogaansamin.

**Kaliya maxkamada ayaa go'aanka kama danbeysata ah  ka gaadheysa inuu Dardaaranku ansax yahay.**

**Hadii aad tahay qof dhalad ah ama aad caadi ugu nooshahay dhulka lailaaliyo, sharicgu wuu ka duwan yahay sida loola tacaalo Dardaarankaaga markaad dhimato.** *Xeerka Hindiya iyo* shrucuuda dhaxalka hindiya ayaa ku qabanaya adiga. Faahfaahin dheeri ah la xidhiidh

**Bearpaw Education**

780.428.0187 or www.bearpaweducation.ca or

**Indigenous and Northern Affairs Canada**

https://www.aadnc-aandc.gc.ca/eng/1100100032357/1100100032361

# Erey-bixinta

**Awood maskaxeed**

Awooda lagu fahmo macluumaadka la xidhiidha go'aan gaadhista iyo awooda lagu aqoonsanayo caqabadaha muuqda ee go'aanka.

**Bixinta warqad dardaaran**

Amar maxkamadeed oo xaqiijinaya in dardaaranku sax yahay sidoo kalena xaqiijinaya magacaabista matale shakhsi oo lagu magacaabey dardaaranka.

**Dardaaran**

Bayaan sharci oo sheegaya sida qof uu rabo in loola tacaalo hantidiisa markuu dhintu ka dib.

**Dhaxal Bixiye**

Qofka dhaxalka bixiya.

**Dhaxal**

Dhamaan hantida aad leedahay markaad dhimato. Hantida aad ugu leedahay dadka kale kireeye ahaan ama aad u magacowdey dhaxal-qaate ee aan qeyb ka ahayn dhaxalkaaga.

**Dhaxal laawe**

Qofka dhinta bilaa dardaaran (dhaxal aan u dardaarmin)

**Daymaha**

Waxa lagugu leeyahay. Kuwan waxa loogu yeedhi karaa daymo, waxaana ka mid noqon kara d hadhaaga kaadhadhka daymaha, amaahda, deymaha guryaha laguugu dhiso iyo cashuuraha.

**Hadhaaga (Hantiyeed)**

Baaqiga hantida ka dib marka hanti cayiman laga bixiyey.

**Hanti**

Waxaad leedahay. Hantida waxa ka mid noqon kara ashyaada (shayada) sida lacag, dhul, maal-gashi iyo hantida-shakhsiga sida dahab iyo alaabta guriga.

**Hanti Gaar ah**

Hanti uu dhaxalku dhigaayo in la siiyo qofka lagu magacaabey.

**Lamaane isku-tiirsan**

Qof aad la leedahay xidiidh isku-tiirsanaan lamaane.

**Maamule**

Qof ay maxakamadi awood u siisey inuu maamulo oo maareeyo hanti dhaxal ah.

**Masuul**

Cida **Ilmaha**, Qof leh masuuliyad sharci si uu u daryeelo dhaqaale ahaana u tageero ilmaha, iyo masuuliyada uu ku sameynayo dhamaan go'aamada la xidhiidha ilmaha. Ilaa maxkamadi amar bixiso, waalidka ilmaha ayaa masuulkooda ah.

**Qaate**

**Hantiyeed**, Qof (shakhsi ama urur) kazoo dhaxla dhamaan ama qeyb ka mid ah hantida qof ka dhintey.

Loo **Haye**, Qof (shakhsi ama urur) kasoo kahela faa'idado hantida cid loo hayo inta uu qaan gaadhayo.

**Siinta maamulka**

Amar amaxkamadeed oo magacaabaya maamule/masuul hanti qof bilaa dardaaran ah( dhinta isagoo dhaxal ka u dardaarmin) sidoo kalena xaqiijineysa in dhaxalka loo qeybin karo dadka ku dhaxlaya dhaxalka sharciga dardaaran la'aanta.

**Wakiilka shakhsiga**

Qofka lagu magacaabay Dhaxalka oo ka masuul ah maamulka hantida dhaxal bixiyaha iyo fulinta tilmaamaha ee Dhaxalka.

**Warqada Tilmaam wax-ka badelka dhaxalka**

Warqad aad sameysid ka dib marka aad dhaxalka bixiso taasi oo wax ka badaleysa qaar ka mid ah waxyaabaha ku jira dhaxalka.

**Xaas**

Qofka qof uu si sharci ah u guursadey/qabo.

**Xidhiidhka-isku tiirsanaanshaha lamaanaha**

Kalmad u gaar ah Alberta loona isticmaalo xidhiidhada ka baxsan guurka oo uu xukumo xeerka isku – tiirsanaanta lamaanaha Alberta.

Waa "xidhiidh isku tiirsanaasho" oo ka dhexeeya labo qof oo:

- Wada noolaa saddex sano ama in ka badan; ama
- Wada nool oo ilmo ka wada dhexeeyo, dhalmo ahaan ama korsoomo; ama
- Saxeexay heshiish isku tiirsanaan lamaane.

"Xidhiidh isku Tiirsanaansho" oo labo qof:

- Midba midka kale nolosha la wadaago; iyo
- Dareen ahaan isku diyaar ah; iyo
- U shaqeeysta hal guri iyo dhaqaale.

# Macluumaad

## Shuruucda

### Daabacaada Alberta Queen

nuqulo daacabacaad xeerar iyo shuruuc bilaasha

Website: www.qp.alberta.ca

## Dawlada iyo Adeeyada maxkamadaha

### Maamulka Alberta

www.alberta.ca

**Alberta Courts**

www.albertacourts.ca

### Resolution and Court Administration Services (RCAS)

Qanuunada iyo Adeegyada Taageero ee Alberta.

La xidhiidh xarunta: 1.855.738.4747

https://www.alberta.ca/rcas.aspx

### Caawimada Alberta

Hel in ka badan 30 barnaamij iyo 120 adeeg bulsho.

Bilaash ku wac: 1.877.644.9992

### Xafiiska Daryeelka dadweynaha iyo Amaanada

Adeegyada iyo caawimada dadka Alberta ee jilicdasan iyo qoysaskooda.

Bilaash ku wac: 310.0000 then 780.422.1868

www.alberta.ca/office-public-guardian-trustee.aspx

## Adeegyada Sharciga

### Adeega Sharci yaqaanada looyarada Alberta

Waxay bixisaa magacyada saddex looyar. Loorkastaaba wuxu bixiyaa saacad badhkeed oo la tali bilaash ah.

Bilaash ku wac: 1.800.661.1095

https://www.lawsociety.ab.ca/public/lawyer-referral/

### Caawimada Sharciga ee Alberta

Bilaash ku wac: 1.866.845.3425

www.legalaid.ab.ca

### Shaybaadhka Edmonton

Shaybaadhka Edmonton. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.702.1725

www.eclc.ca

### Hagitaanka Sharci ee Calgary Legal

Shaybaadhka Calgary. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.234.9266

http://clg.ab.ca

### Shaybaadhka Bulshada– Central Alberta

Shaybaadhka Alberta. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

**Central Alberta:** 403.314.9129

**Fort McMurray:** 587.674.2282

**Lloydminster:** 587.789.0727

**Medicine Hat:** 403.712.1021

www.communitylegalclinic.net

### Hagaha Sharci ee  Grande Prairie

Shaybaadhka Grande Prairie Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.882.0036

www.gplg.ca

### Hagaha Sharci ee  Lethbridge

Legal clinic in Lethbridge. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.380.6338

http://www.lethbridgelegalguidance.ca/

### Wac Sharciga

Warbixin la duubey oo diyaar 24 saac maaliwalba 7 maalmood ee wiiga.

Bilaash ku wac: 1.800.332.1091

http://clg.ab.ca/programs-services/dial-a-law/

## Macluumaad

### Ilaalinta Dadka daryeelka ku jira

Soo sheeg xadgudubyada waayeelka ka helaya daryeel ama caawimo adeega dadweynaha ku deeqeen.

Bilaash ku wac: 1.888.357.9339

www.alberta.ca/report-abuse-to-protection-for-persons-in-care.aspx

### Shabakada Aqoonta Dadka waayeelka ah

Macluumaad sharci oo ku sahabsan dadka waayeelka ah.

www.oaknet.ca

### Midowga ururka sare ee Edmonton (SAGE)

780.423.5510

www.MySage.ca

### Xarunta Kerby (Calgary)

403.265.0661

https://www.kerbycentre.com/

### Xarunta macluumaadka ee Golden Circle Senior Resource Centre (Calgary)

403.343.6074

www.goldencircle.ca

# U Dadaarmid Dhaxal

Buugani waa mid ka mid ah daabacado badan oo ay soo saartay Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta. Dhamaan daabacaadaha waxa si bilaash ah loogala degi kara iyadoo la bookhanayo www.cplea.ca/publications or www.cplea.ca/store

Daabacadaha kale ee la xiriira mawduucaan ee laga yaabo inaad daneyneyso wax ka mid ah:

- Dardaarmid
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Noqoshada Wakiil
- Noqoshada Wakiil Shakhsi
- Noqoshada Qareen ku xusan Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Awoodaha Guud Qareenka
- Xeerka Masuulnimada iyo Amaanada
- Ayey/Awow iyo Caruurtaada
- Xadgub Waayeel

Waxa Mahadnaq gaar ah iska leh ururka Sharciga Alberta iyo laanta cadaalada Kanada bixintooda kharashka hawl-galka, oo suurto galiya daabacaadahan oo kale.

Alberta LAW FOUNDATION

Department of Justice Canada

Ministère de la Justice Canada

**We want to know what you think!**

Take our one-minute survey

Capture this QR code with your phone camera or go to https://bit.ly/2TgYzTk

Centre for Public Legal Education Alberta

**Phone** 780.451.8764
**Fax** 780.451.2341
**Email** info@cplea.ca
**Web** www.cplea.ca

*Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan. Wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo ku sahabsan **kaliya sharciga Alberta**. 2020*